

Barnaamijka Dibu wershadaynta qashinka ee magaalada South Portland

Magaalada South Portland waxa ay leedahay hadaf ah in la dhimo 70% qashinka cuntada ee ka mid ka ah qashinka guud illa inta laga garaayo 2030ka. Ka weecinta qashinka cuntada qashinka kale ee adag ee degmada waa mid ka mid ah siyaabaha ugu waxtarka badan ee lagu gaari karo yoolkan sababtoo ah celcelis ahaan, ilaa saddex meelood meel, qashinka gurigu wuxuu ka kooban yahay haraaga cuntada. Halkii la tirtiri lahaa qashinka ama loo diri lahaa qashin-qubka, qashinka cuntada waxaa loo rogi karaa composto ama waxaa loo diri karaa dheef-shiidka anaerobicga si loo soo saaro koronto waarta.

Bilow!

Ku biirista barnaamijka waa sahlan tahay, raac talaabooyinkan:

1. Qaado Qashin qaade Bilaash ah

Deganayaashu waxay magaalada ka soo qaadan karaan qashin qaade 1-gallon iyo/ama 12ka gallon oo bilaash ah. Kaliya joogso Xarunta Adeegyada Dawladda Hoose ee cinwankeegu yahay 929 Highland Ave (Isniin-Jimce 7:30 subaxnimo ilaa 3:00 galabnimo). Su'aalo ma qabtaa? Kala xidhiidh Denise ee Hawlaha Guud halkan 207-767-7635.

Qashin qaadaha 12-gallon ah ee giraangiraha ku socda Qashin qaadaha 1-gallon ah oo dabool leh



2. Tuur qashinka cuntadaada

Deganayaashu waxay leeyihiin laba ikhtiyaar oo lagu tuuro:

A) Goobaha la dhigaayo

Deganayaashu waxay keeni karaan hadhaaga cuntadooda mid ka mid ah lixda goobood ee loo qoondeeyay in la dhigo ee ku yaal agagaarka magaalada:

Hoolka Magaalada (25 Cottage Rd.)

Dhismaha Dayactirka Garoonka Golfka @ 221 Westbrook St

Xafiiska Qorshaynta & Horumarinta (496 Ocean St.)

Barxadda Baarkinga Saree e Dugsiga Saree e South Portland @ 637 Highland Ave

Xarunta Beesha Redbank @ 95 MacArthur Cir W

Xarunta wareejinta @ 929 Highland Ave

B) Qandaraaska Gaarka ee lala galaayo Garbage to Garden

Ama waxaa laga yaabaa inaad kireysato Garbage to Garden, qaadaha qashinka cuntada ee gaarka ah, isaga oo qadanaya khidmad bishii ah si u u-faaruiyo qashin-qubkaaga guriga hortisa toddobaad kasta mar. Magaaladu waxay qaadaha kala xaajootay qiimo dhimis loogu talagalay adeegan (\$12/bishii). Kala xiriir Garbage to Garden halkan 207-332-0277 ama info@garbagetogarden.org.

Maxaa lagu ridaaya qashin qaadaha?

Sida caadiga ah, haddu qashinka bato, wa in la qaada! Si ay arintu u fududaato, waa in lagu dhex ridda gashin gubka baco wax laga dhex arki karo, saafi ah ama plastig cad ah oo qaadaya haraaga cuntada.

Macluumaad dheeraad ah, ka eeg liiska tafatirka ecomaine ee shayada gali kara ama aan geli karin qashin qubkaaga cuntada iyo fiidiyowiyada si aad u hesho tilmaamo ku saabsan sida loo maareeyo qashinkaaga cuntada.

HAA	MAYA
✓ rooti, baasto, bariis, badar	✗ alwaaxda lagu masaxo dhallaanka iyo gacmaha
✓ kafeega ridqaan iyo filtarrada	✗ qashinka bisadaha, qashinka xayawaanka
✓ weelasha dib lo wershadeeyn karo	✗ xafaayadda
✓ alaabta caanaha	✗ muraayad
✓ qolof ukun, qolof cuntada badda, lafaha	✗ daawooyin
✓ dufan, saliid	✗ polystyreneka/styrofoamka
✓ miro iyo haraaga khudradda	✗ xargaha caagga ah
✓ hilibka iyo haraaga kalluunka	✗ qashinka daarada
✓ xaashida wax lagu masaxo iyo alwaax cuntada lagu laaqo	✗ balaastiig, marka laga reebo*
✓ bacaha shaaha	

*Hadhaaga cuntada waxa lagu ridi karaa bac wax laga dhex arki karo ama cad.

Haraaga Cunnadaada waxay quudisaa Maine

Haraaga cuntada ee laga soo ururiyo goobaha la dhigo ayaa marka hore loo qaadaa si deg deg ah ilaa Portland. Xamuulo badan oo isku-dar ah oo haraaga cuntada ah oo ku urura ecomaine ayaa haddana loo qaadaa Beerta Canaha ee Stonyvale (Stonyvale Dairy Farm) ee Exeter, Maine. Beerta dhexdeeda, haraaga cuntada ayaa lagu qasaa digada lo'da iyada oo la isticmalayo dheefshiidka anaerobicga si loo abuuru koronto waarta, bacriminta beeraha, iyo gogosha xoolaha loogu talagalay lo'da caanaha laga liso.

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo

1. Sideen uga hortegi karaa in qashin qubkayga ay wasakheeyaan duqsiga iyo urtu?

Bacaha saafiga ah ee dukaanka raashinka waxaa loo isticmaali karaa in lagu xiro qashinka cuntada kahor inta aanad ku riddin qashin qubka. Exter Agri-Energy waxay leedahay mishiin kala sooca qashinka cuntada iyo bacaha. Waxa kale oo aad qashin qubka ku dhejin kartaa jaraa'id kahor inta aanad ku tuurin qashinka cuntadaada. Dadka deegaanka ayaa ka mas'uul ah nadiifinta qashin qubka.

2. Ka waran haddii qashin qubkaygu lumo ama dhawac gaadho?

Haddii qashin qubku ka lumo ama dhaawac gaadho, kala xidhiidh Denise at Public Works 207-767-7635 si ad u heeshid mid beddel ah.

3. Waxaan isticmaalaa qashin qubka gudaha saxanka lagu dhaqo weelka ama gacmaha. Miyaan joojiyo taas?

Haa, waxaanu si adag kuugula talinaynaa inaad qashinkaaga cuntada ku riddo qashin qubka halkii aad ku riddi lahayd saxanka lagu dhaqo weelka ama gacmaha. Waxaa jira isticmaal sare ee qashinka dib lo wershadeeyay. In la raaciyo qashinka cuntada nidaamka qaada biyaha wasakhda ah ee magaalada waxay dhib horle ku haysa deegaanka.

4. Waxaan hore ugu shubay qashinki cuntadayda daaradayda dambe. Miyaan joojiyo taas?

Khasab maaha. Waa inaad oggatiid inaad xor u tahay inaad ku sii wadato bacrinta daaradaada dambe. Dadka deegaanka ayaa laga yaabaa inay u isticmaalaan barnaamijka qashin ururinta cuntada si dib logu wershadeyo walxaha aadan ku ridi karin daaradooda dambe- sida dareeraha, dufanka, saliidda, dufanka, hilibka iyo haraaga kalluunka, xaashida wax lagu masaxo, weelasha dib lo wershadeeyn karo, iyo sidoo kale filtarrada kafeega iyo bacaha shaaha. Ururinta qashinka cuntadu waxay sidoo kale noqon kartaa kayd bilaha jiilaalka.

5. Waxaan horey heshiis gaar ah ula galay Garbage to Garden. Maxaan sameeyaa?

Taasi adiga ayay kugu xiran tahay! Marka aad ka heshid gaadhigaaga qashinka cuntada ee bilaashka ah magaalada, doorashada adigaa leh. Waxaad dooran kartaa inaad sii wadato qandaraaska aad la leedahay Garbage to Garden si aad ugu rarto qashinkaaga cuntada oo ay ku siiyan compostga. Magaaladu waxay kala xaajootay qiime dhimis. Haddii kale, waxaad keeni kartaa qashinkaaga cuntada mid ka mid ah afarta goobood ee lagu ururiyo lacag la'aan. Ama, haddii aad jeceshahay in qashin-qubkaaga ay ku nadiifiyaan toddobaad kasta Garbage to Garden, waxaad sii wadi kartaa bixinta adeegga sicirka oo dhan (Fiiro gaar ah: adeegga qiimaha gorgortanka magaaladu ay la gashay Garbage to Garden qashinka kuma jiro adeegga nadiifinta qashin qubka) .

6. Immisa jeer ayaa laga ururin doonaa qashinka cuntada goobaha lagu dejiyo?

Gaadhiyada yaal meelaha lagu soo dejiyo waxaa faaruqin doona toddobaad kasta Garbage to Garden. Bilaha xagaaga, gaadhiyada marar inta ka badan ayaa lagu faaruqi doonaa. Boodh ka sameysaan qooryo la jarjaray ayaa laga heli karaa meelaha lagu dejiyo si u xakameyso urta waxaana lagu soo qaadaan karaa qashin qubka ka dib marka la tuuro qashinka cuntada. Haddii aad aragto gaadhi lagu soo dejiyo qashinka cuntada oo buuxa ama uraaya, fadlan la xidhiidh Xafiiska Horumarinta (Sustainability Office) si la isugu dubbarido qaadista 24 saacadood gudahood.